

# BAARKIN IYO BAS BILAASH AH

## Geerashyada Baarkinka Bukaanka iyo Booqdaha (eeg maabka dhabarka)

Dhamaan geerashyada baarkinka ee Medical Center waxay leeyihiin goobo baarkin iyo wiishash loogu talagalay naafada.

- SAFEAUTO Hospitals Parking Garage – Goobo baarkin oo naafada loogu talagalay ayaa laga heli karaa dabaq kasta oo ah geerashka ku yaala dhamaadka waqooyiga, una dhow wiishashka. Irida laga galo geerashka waxay ku taala Westpark Street. Heerka labaad, birij ama buundo ayaa isku xidha geerashka iyo Ross Heart Hospital (Cisbitaalka Wadanaha) ee Ohio State.
- 12th Avenue Parking Garage – Goobo baarkin oo naafada loogu talagalay ayaa laga heli karaa dhamaadka bariga ee heerarka koobaad iyo saddexaad. Heerka saddexaad, birij ama buundo ayaa isku xidha geerashka iyo Medical Center, gaar ahaan Doan Hall iyo Postle Dental Clinic.

## Qiime-dhimista Baarkinka ee Bukaanka iyo Booqdeyaashooda

Qiime baarkin oo la dhimay ayaa loo hayaa bukaanka iyo booqdeyaashooda isticmaala geerashyada baarkinka ee 12th Avenue ama SAFEAUTO Hospitals. Kaadhka qiimaha baarkinka ee la dhimay waxa uu kuu oggalaanayaa inaad \$2 ku dhigatid baarkinka halkii mar ama maalin kasta oo aanad ka bixin baarkinka. Waa inaad isticmaashid kaadh baarkin oo cusub wakhti kasta oo aad baxdid. Bukaanka iyo booqdeyaashoodu waxay kaadhahka baarkinka qiimihiisa la dhimay ka heli karaan diiwaangalinta (registration) ama shaqaalaha Adeegga Macaamiisha (Customer Service) ee jooga Miis Wareed kasta. Ka dib 9 fiidnimo, u tag Miiska Wareedka Rhodes Hall (Rhodes Hall Information Desk).

## Shaqaalaha Baarkinka ee Bukaanka

Saacadaha : Isniin - Jimce

Rhodes Hall	5 subax-5:45 galab.
James Cancer Hospital	6 subax-5 galab.
Cramblett Medical Clinic	7 subax-5 galab.

(Saacadaha shaqada ka dib u tag shaqaalaha baarkinka ee jooga Rhodes Hall)

Si aad u isticmaashid adeegga, kaliya baabuur ku tag xagga hore ee Rhodes Hall, James Cancer Hospital ama Cramblett Medical Clinic. Shaqaalaha baarkinka ayaa ku gargaari doona. **Bukaanka iyo booqdeyaashoodu waxay weydiisashada adeegga shaqaalaha baarkinka ka sameysan karaan diiwaangalinta (registration) ama Miis Wareed kasta si ay u helaan qiimaha la dhimay ee ah \$5 halkii baarkin ama maalin kasta.** Dhamaan dadka kale ee isticmaala adeegga shaqaalaha baarkinka waxa laga qaadi doonaa \$11 halkii baarkin ama maalin kasta. Qaadashada baabuurka ka dib saacadaha shaqada waxa laga heli karaa irrida galitaanka ee Rhodes Hall ilaa habeen-badhka. Ka dib habeen-badhka maalmaha shaqada, iyo Sabtida iyo Axadda iyo maalmaha ciidaha, la xidhiidh Ilaalada Cisbitaalka (Hospital Security) oo lambarkoodu yahay 293-8500 (3-8500).

## Adeegga Baarkin & Gaadiid (Park & Ride) iyo Adeegga Baska ee Bilaashka ah (Shuttle Service)

Adeeg baarkin iyo bas bilaash ah ayaa ku geynaya oo kaa soo celinaya geerashka baarkinka, dhismeyaasha Medical Center, iyo hoteelada aagga Isniin ilaa Jimce saacadaha 7:00 subaxnimo ilaa 9:00 fiidnimo. Butoon/bar wicitaan ayaa ku yaala dhamaan irridaha waaweyn ee dhisme kasta oo ah Medical Center iyo dhamaan geerashyada bukaanka iyo booqdeyaasha. Si adeegga baska aad uga heshid hoteelada aagga, wac (614) 293-8669. Waxa kale oo jira basas si joogto ah uga baxa OSU Medical Center ilaa OSU Martha Morehouse Medical Plaza iyo ilaa University Hospital East. Booqo Miis Wareed kasta si aad u heshid faahfaahin dheeraad ah.

*Fadlan Adeegga Macaamiisha (Customer Service) ka wac 293-8944 si aad u heshid war dheeraad ah.*

*Warku waa uu is beddeli karaa ogeysiis la'aan.*